

## Tababarka Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Taageerada Shakhsiyeed ee La iskaga baahan yahay

Laga bilaabo Sibtambar 1, 2021, tababarka waxaa loogu talagalay dhammaan shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Shaqaalaha isqoray ka hor taariikhdaasi waa in ay qaataan tababarka dib u eegista muddo aan ka dambeyn Maarso 31, 2022 si ay u sii shaqeeyaan.

### Taageerida baahiyaha jireed iyo dareen

- Bixinta adeegyada la ogolaaday
- Xiriirida waxtarka leh
- Qiimeynta madax bannaanida qof ahaaneed
- Bixinta adeegyada iyo taageerada ku saleysan qofka

### Tallaabooyinka dhanka ammaanka iyo xaaladda degdega ah

- Ka hortagga xadgudubka
- Soo sheegida dhacdada
- Xakameynta infekshanka
- Farsamooyinka saxda ah ee jirka

### Bixinta adeegyada qofka ku saleysan

- Taageerida macaamiisha dhanka raadinta hadafkooda nololeed
- Awoodsiinta macmiilka si ay u gaaraan kala doorashooyinkooda gaarka ah
- Aqoonsiga in macaamiishu yihiin dad khibrad leh marka ay noqoto noloshooda u gaarka ah

### Maareynta daawooyinka

- Bixinta taageero
- Badbaadada daawada
- Fahamka marka loo baahan yahay tababar dheeraad ah
- Aqoonsiga dhacdooyinka waxyeelada leh ee daawada

### Doorarka iyo mas'uuliyadaha HCW iyo PSW

- Wargalinta Waajibka ah
- Heerarka xirfadeed
- Daryeel bixiyaha u diiwaangashan Medicaid
- Waajibaadyada shaqaalaha u shaqeeya macaamiisha

### Bixinta daryeelka shakhsi ahaaneed

- Liiska hawsha iyo heshiisyada adeega
- Badbaadada
- Fahamka marka loo baahan yahay tababar dheeraad ah
- Adeegyada iyo taageerada qofka ku saleysan


## Muxuu tababarku muhiim ugu yahay dadka helaya adeegyada?

- Wuxuu kor u qaadaa caafimaadka, fayo-qabka, tayada nololeed, iyo badbaadada
- Adeegyada waxaa la bixiyaa iyada oo lagu saleynayo waxyaabaha ay macaamiishu doorbidayaan, hadafkooda, iyo rabitaankooda
- Wuxuu awood siiyaa ka qayb qaadashada bulshada

## Muxuu tababarku muhiim ugu yahay shaqaalaha?

- Wuxuu xaqiijiyaa fayo-qabka iyo badbaadada
- Wuxuu wanaajiyaa ku qanacsanaanta shaqada
- Cimri-dheeraynta xirfadeed
- Wuxuu yareeyaa dhaawacyada shaqada
- Fursad dhanka kobacaha ah
- Horumarinta xirfadeed

## Waa maxay tirada saacadaha loo baahan yahay tababarka?



## Ayaa bixiya tababarada loo baahan yahay?

Tababarka Carewell SEIU 503 waa iskaashi ka dhexeeya Gobolka Oregon iyo SEIU 503. Carewell ayaa bixin doonta tababarka shaqaalaha. Waxay shaqeysaa iyada oo iskaashi la leh:

- SEIU 503
- Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon
- Maamulka Caafimaadka Oregon Qaybtiisa Nidaamyada Caafimaadka
- Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon

## Sidee baan wax dheeraad u ogaadaa?

Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon:  
<https://go.usa.gov/xvVVT>

Tababarka Carewell SEIU 503:  
[www.carewellseiu503.org/training](http://www.carewellseiu503.org/training)

Wakhtiga loo qabtay tababarka shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed ee la iskaga baahan yahay: <https://apps.state.or.us/Forms/Served/di2519b.pdf>

Su'aalaha Inta badan La isweydiiyo: <https://apps.state.or.us/Forms/Served/di2527b.pdf>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon kala xiriir 877-624-6080. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.